VERMONT
DEPARTMENT OF HEALTH

# Tijaabinta Biyaha Ceelka: Hagaha Gataha Guriga

Diisambar 2023

## Ilaali caafimaadka qoyskaaga - iyo maalgalintaada

Ma iibsanaysaa guri leh ceel ama durdur? Ilaha biyaha gaarka ah waxa ku jiri kara walxo khatar badan oo heerarkoodu sarreeyo oo keeni kara saamayn caafimaad iyo jirro. Waxa fiican inaad ogaato waxa biyaha ku jira maadaama ay qoyskaagu cabbi doonaan kahor inta aadan guriga aad rabto iibsan. Waa kan waxa ay tahay inaad samayso si aad biyaha u tijaabiso

### Ahaw guri-gate caqli badan

Biyo nadiif ah oo badbaado leh waxay ilaaliyaan caafimaadka qoyskaaga iyo maalgalintaada. Waxa jira tallaabooyin badan oo la qaado marka guri la iibsanayo, laakiin tijaabinta biyaha – oo ku kacaysa $159 – waa arrin fudud. Waxaad muunado ka qaadi kartaa qasabadda adigu ama waxaad waydiisan kartaa baaraha guriga inuu ka qaado. Ka daawo fiidyowgeena ku saabsan sida loo tijaabinayo biyahaaga barta HealthVermont.gov/water (Ingiriisi ku qoran).

### Waxa biyaha laga tijaabinayo

Ka tijaabinta faddareeyayaasha caamka ah iyadoo la isticmaalayo **Xirmada Tijaabinta Mulkiilaha Guriga Vermont** oo laga keeno Shaybaarka Waaxda Caafimaadka. Tan waxa ka mid ah tijaabooyinka:

- Bakteeriya
- Kiimikooyinka aan orgaaniga ahayn
- Shucaaca gross alpha

Sidoo kale waxa dhici karta inaad rabto inaad hawada ka tijaabiso radon. Booqo HealthVermont.gov/radon (Ingiriisi ku qoran) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

### Halka laga helo tijaabada biyaha

Isticmaal shaybaar biyaha la cabbo qaabilsan oo muctarif ah. Waxaad ka dalban kartaa agabka tijaabada Shaybaarka Waaxda Caafimaadka 800-660-9997 ama 802-338-4724 ama isticmaal shaybaar biyaha la cabbo qaabilsan oo muctarif ah oo kale. Si aad u hesho liiska shaybaaadhada muctarifka ah, booqo TinyURL.com/certified-lab (Ingiriisi ku qoran).

### Waxaad samaynayso kadib tijaabada

Natiijooyinka tijaabadu waxay kuu sheegi doonaan haddii faddareeyayaashan caamka ah ay biyahaaga ku jiraan iyo siday u saamayn karaan qasabadaha iyo qalabka biyaha muddo kadib.

Haddaad su'aalo ka qabto natiijooyinkaaga iyo tallaabooyinka xiga, booqo HealthVermont.gov/water-a-z (Ingiriisi ku qoran). Sidoo kale waxaad talo ka heli kartaa khubarada tayada biyaha ee Waaxda Caafimaadka. Wac 802-489-7339 ama iimeyl u dir AHS.VDHDrinkingWaterProgram@vermont.gov.

**Wax badan ka ogow halkan HealthVermont.gov/water (Ingiriisi ku qoran)**

Somali

VERMONT
DEPARTMENT OF HEALTH

# Well Water Testing: A Home Buyer's Guide

December 2023



## Protect your family's health – and your investment

Are you buying a home with a well or spring? Individual private water sources can contain harmful substances at levels that could cause health effects and make you sick. It's better to know what's in the water you and your family will be drinking before you buy the house of your dreams. Here's what you need to do to get the water tested.

### Be a smart home buyer



Clean, safe drinking water protects your family's health and your investment. There are many steps to buying a home, but testing the water – at a cost of $159 – is a simple one. You can collect samples from the tap yourself or ask your home inspector to collect them. Watch our how-to video on testing your water at HealthVermont.gov/water (in English).

### What to test the water for




Test for common contaminants using the **Vermont Homeowners Testing Package** from the Health Department Laboratory. This includes tests for:

- Bacteria
- Inorganic chemicals
- Gross alpha radiation

You may also want to test for radon in air. Visit HealthVermont.gov/radon (in English) for more information.

### Where to get a water test



Use a certified drinking water laboratory. You can order test kits from the Health Department Laboratory at 800-660-9997 or 802-338-4724 or use another certified drinking water lab. For a list of certified labs, visit TinyURL.com/certified-lab (in English).

### What to do after you test

The test results will tell you if these common contaminants are in your water and how they could affect household plumbing and appliances over time.



If you have questions about your results and next steps, visit HealthVermont.gov/water-a-z (in English). You can also get advice from the Health Department's water quality experts. Call 802-489-7339 or email AHS.VDHDrinkingWaterProgram@vermont.gov.

**Learn more at HealthVermont.gov/water (in English)**